

Waayo nolasha qof kasta **waa qaali:**

wac **9-1-1** haddii aad ka shakido
in daawo la iska badiyay.

WAA MAXAY SHARCIGA GOOD SAMARITAN?

Sharciga Good Samaritan ee Maine ayaa ka difaacaaya qofka in la xiro ama lagu dacweeyo danbiyada qaar haddii aasaaska xiristaas ama dacwadaas ay ka dhalatay in qofku iska badiyay daroogo ama uu caawimaad caafimaad ka codsanaayo qof kale oo qaba cilada.

Sharciga Good Samaritan ee Maine wuxuu difaaca shaqsi:

- Si daacadnimo leh, u doona caawimaad caafimaad qof waajahaaya dibaato la xiriirta iska badinta daroogo;
- Waajahaaya iska badinta daroogada oo u baahan caawimaad caafimaad;
- Ku "bixinaaya gurnad" goobta iska badintu ka dhacday. "Bixinaaya gurnad" ayaa ka dhigan talaabo kasta oo ay ku jirto daryeelida qof waajahaaya iska badinta daroogo looga shakiyay.

Sharciga Good Samaritan ee Maine wuxuu ka difaaca shaqsi:

- Xariga iyo dacwada la xiriirta inta badan danbiyada aan dagaalka ahayn, ayna ku jiraan dhammaan danbiyada daroogada;
- Burinta damaanad ku siidaynta, danbi cafinta, xukunka shaqada bulshada ee la kormeeraayo, siidaynta lala soconayo, wareejinta dacwada, iyo cafinta maamul ee danbiyada intooda badan aan dagaalka qusayn, ayna ku jiraan dhammaan danbiyada daroogada;
- Xariga ku saleysan waarantiyada taagan ee inta badan danbiyada aan dagaalka qusayn, ayna ku jiraan dhammaan danbiyada daroogada.

Sharcigu MA difaacaayo qof gaystay danbiyo dagaal, ayna ku jiraan, laakiin kuma koobna:

Danbiyada rabshada

Dilka/Xasuuqa
Jebinta amarka difaaca
Rabshada qoyska

Danbiyada galmada

Kufsiga wayn ee galmada
Taabasho galmo oo sharci daro ah
Xadgudubka galmo ee ka dhanka ah ilmaha

Danbiyada ka dhanka ah carruurta

Dayaca ilmaha
Khatar gelinta faya dhawrka ilmo
Iwm.



Xog badan oo ku saabsan Sharciga Good Samaritan ee Maine ka eeg [KnowYourOptions.ME](https://www.knowyouroptions.me).

OPTIONS
SAVE LIVES